

Waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo ee dadka cudurka macaanka/sonkorowga qaba ay isticmaalaan

Barta internetka 1177.se ka dalbo waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo

Kaddib markii kalkaalisada daryeesha bukaanada macaanka/sonkorowga ay ruqsadda ku qorto, waxaad Waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo ka dalban kartaa barta internetka 1177.se. Waxaad dalban kartaa dareemayaasha gulukooska, gudbiye, bambka insulinka aan tuubada lahayn (pods) iyo qaar kaloo badan. Waxyaalahaas waxaa inta badan dalban kartaa saddexii bilood ba hal mar. Waqtiga maalinta aad rabto inaad dalabato adiga ayaa go`aankeeda iskaleh.

Kalkaalisada daryeesha bukaanada macaanka/sonkorowga

Kalkaalisada daryeesha bukaanada macaanka/sonkorowga ee adiga ku qaabilsan ayaa cusboonisiiso ruqsadaha. Sidaas darteed iyada kala xiriir wixii su`aallo ah, oo xiriir la leh ruqsadaha Waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo ama daawayntaada.

Xarunta Hjälpmedelscentrum

Keenista Waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo waxaa maamula Hjälpmedelscentrum.

Alaab-keenaha

Alaab-keenaha ayaa lagala xiriira wixii cabasho iyo taageero xiriir la leh. Arrimaha aad kala xiriiri karto waxaa tusaale ahaan kamid ah, cillada guda-gelista app-ka ama dhibaato isticmaalka qalabka kala kulanto. Siyaabaha alaab-keenaha loola xiriiro waxaad ka aqrisan kartaa warqadda ku dhex jirta alaabta lagu keenay ama 1177.se

Farmashiyaha

Wixii cabasho ah oo ku saabsan wixii aad farmashiyada ka soo qaadatay, waa inaad kala xiriirta isla farmashiyadaas.

Taageerada farsamada 1177.se

Cilladaha adeegyada farsamada elektroonikada ku salaysan, ka aqriso 1177.se

Dalbashada Waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo

Waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo waxaad si fudud ugu dalban kartaa adeegyada farsamada elektroonikada ku salaysan 1177.se

Adigoo isticmaalayo adeegyada farsamada elektroonikada ku salaysan e-tjänsten ayaa sidatan u dalban kartaa

- Adigoo isticmaalayo aqoonsiga Bank-ID ama Freja+ guda-gal 1177.se
- Hoosta cinwaaanka "*Övriga tjänster, gå till Läkemedelsnära produkter*
- Jag-sii "*Beställ förskrivna förbrukningsprodukter*, waxaa halkaan kaaga soo ifbixi doono Waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo ee aad ruqsadda u haysato
- Ka xulo waxyaalaha aad ku talo jirto inaad dalbato

Adeegyada barta internetka 1177 aad ka heli karto waxaa kamid ah:

- Ka dalban kartaa waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo
- Ka akhrisan kartaa tirada kala baxsashada/dalbashada ku hartay
- Ka akhrisan kartaa goorta kala baxsashada/dalbashada ku xigta ay suurtagal noqon karto
- Ka akhrisan kartaa taariikhda ugu dambayso ee ruqsadda

- Ka akhirsan kartaa magaca iyo rugta ruqsadda laga soo qoray. Isla halkaas waxaad ka habsan kartaa in warbixinta xiriirka, sida adreeskaaga iyo lambarka mobaylkaaga ay sax yihiin.

[Haddii aadan isticmaali karin barta internetka 1177.se](https://www.1177.se)

Haddii aadan isticmaali karin barta internetka 1177.se, waxaad caawinaadda dalbashada waxyaalaha maalinlaha la isticmaalo awgeed la xiriiri kartaa Adeegga macaamiisha ee Hjälpmedelscentrum

Adeegga macaamiisha ee Hjälpmedelscentrum, 021-17 30 48

Warbixin dheeraad ka akhriso barta internetka 1177.se, ku saabsan cudurrada, dhibaatooyinka, cudurka macaanka/sonkorowga